**Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# FAAFINTA RASMIGA AH

**SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE**

ألنَّشرة الرَّسميةلجمهورية صوماليلاند

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA,
MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA,
*E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com*

| Sanadka: 1aad | Cadadka: 5aad ee May | Taariikh: 02/06/2012 |
|---|---|---|

**QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.**

**RUKUNKA (Subscription):**

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.*

## TUSMADA CADADKA

| | Bogga |
|---|---|
| ***QAYBTA KOWAAD*: XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:** *Sooma bixin* | |
| ***QAYBTA LABAAD*: XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:** | |
| 1) **Xadaynta Madaarka Caasimadda** | |
| • **XEER MADAXWEYNE No: 0231/052012** | **276** |
| • **Go'aanka Guddida Qaran ee Xadaynta** | |

| | |
|---|---|
| Madaarka<br>Caasimada Hargeisa | |
| 2) **Magacaabid,**<br>XEER MADAXWEYNE Lr: 0232/052012 | 282 |
| 3) **Magacaabid,**<br>XEER MADAXWEYNE Lr: 0240/052012 | 284 |
| 4) **Xil-ka Qaadis** | 285 |
| 5) **Cafis Madaxweyne,**<br>XEER MADAXWEYNE Lr: 0241/052012 | 286 |
| ***QAYBTA SADEXAAD*:**<br>**DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM** | |
| Xeer Wasiir No .5 (Ministerial decree No.5) oo lagu dhaqan gelinaayo cashuurta ku-dhejinta Tigidhada | 289 |
| **QAYBTA AFRAAD: AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**<br>*Sooma bixin* | |

# QAYBTA LABAAD:

# XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:

**REF JSL/M/XERM/249-1065/05/2012** **DATE 03/05/012**

## XEER MADAXWEYNE No: 0231/052012

### Xadaynta Madaarka Caasimadda

### Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | **Qodobka 12aad, Faqradiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Qodobka 1aad Xubintiisa Hore ee Xeer Lr: 17/2001;** |
| **Markuu Tixgaliyey:** | **Taladii ay soo Jeediyeen Guddidii ka koobnaydAfarta Wasiir iyo Duqa Caasimadda ee loo magacaabay Xadaynta Madaarka;** |
| **Markuu Ogaaday :** | **In ay lagama maarmaan tahay in la kala xadeeyo dhulka Madaarka Caasimadda Hargaysa iyo Dhulka Degaanka iyo daaqsinka si aan loo soo gelin xadka dhulka Madaarka Caasimada Hargaysa** |

**Markuu Aqoonsaday:** In hada ay gaadhay Somaliland maqaam sare oo beesha caalamku ay soo hiranayaan, loona baahan yahay in Madaarka Caasimadu uu noqdo mid leh Heerka Madaarada Caalamka, lana sugo Nabadgeliyada Madaarka iyo Diyuuradaha;

**Markuuisku Qanciyey:** In ay waajib tahay sida maqaamka Madaarada Caasimadaha la mid noqdo oo ah xad Go'an oo leh bed sugan dhinac walba afarta jihoba, kana baxsan dhulka degaanka, kaas oo xaydaabyo loo sameeyo;

**Markuu La Tashaday:** Masuuliyiinta kale ee ay hawshani khusayso;

## Wuxuu Go'aansaday

**In la dhaqan geliyo Go'aanka Guddida Xadaynta Madaarka Caasimadda ee halkan ku lifaaqan.**

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Siilaanyo**
**Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland**

| Republic of Somaliland<br>Dawlada Hoose Hargeysa | JAMHUURIYADA SOMALILAND<br>MUNICIPALITY OF HARGEISA |
|---|---|
| Email ADDRESS: Hargeisa mayor@yahoo.com or www.hargeisamunicipality.net or tel 4424418 | |

Ref: GXACH/H___/2012

Date: 13th March 2012

Ku: Madaxwaynaha jamhuuriyada Somaliland =Hargeisa=

Uj: **<u>Go'aanka Guddida Qaran ee Xadaynta Madaarka Caasimada Hargeisa</u>**

Tixraac warqada lr:JSL/M/G/_____/102011 ee ____ ujeedadeeduna ahayd magacaabid Gudida xadaynta Madaarka Caasimada Hargeisa, kana soo baxday Xafiiska Madaxwaynaha jsl. Guddidu iyagoo masuuliyadii loo igmaday gudanaya waxay yeesheen kulamo shirar joogto ah, iyagoo guddi hoosaad farsamo oo ka kooban DHH, WHG & WDH oo soo sammeeyey xog ururinta xadkii hore ee madarka, tallo bixinta ka soo jeediyey xadka cusub, sidaasi awgeed Guddidu:-

Markay Arkeen: Degreetada Madaxwaynaha JSL ee Magacaabista Guddida Xadaynta Airportka Caasimada Hargeisa

Markay Aqoonsadeen: Qodobka 12 aad, faqradiisa 1 aad ee Dastuurka Dalkan JSL & Qodobka 1aad Xubintiisa ee xeer No: 17/2001

Markay Oggaadeen: In ay lagama -maarmaan tahay in la kala xadeeyo dhulka madaarka Caasimada Hargesia & Dhulka Deegaanka & Daaqsinka si aan loo soo galin xadka Dhulka Madaarka Caasimada Hargeisa

Markay Aqoonsadeen: In hada ay gaadhay Somaliland maqaam sare oo beesha caalamku ay ku

soo hiranayaan , loona baahan yahay in madaarka caasimadu uu noqodo Mid leh standarkii madaarada & Dayuuradaha.

Markay isku qanciyeen: In ay waajib tahay sida maqaamka madaarada caasimadaha lamid noqdo oo ah xad go'an oo leh bed sugan dhinac walba affarta jihabo, kana baxsan Dhulka Degaanka, kaas oo xaydaabyo loo sameeyo.

Markay la tashadeen. Masuuliyihiinta ay hawshani khusayso.

**Go'aanka Guddidu:-**

Ka dib markay arkeen Guddidu dhamaan asbaabaha sare ku xusan waxaa uu Go'aansaday Guddidu in xadka madaarka Caasimada Hargeysa uu noqdo.

**(A) Jihada Konfurta**

1. Xadka konfurta Madaarka Caasimada Hargeisa ( Bari & Galbeedba ) waxaa uu noqonayaa '400m' oo ah xayndaabka koowaad.
2. Xadka uu madaarku u fididoona una xadidan waxa uu noqon doonaa (1.2km) kaas oo ay beeralayda daaqsin kaliya u noqda laakiin wax dhisme ah aan laga sammayn Karin lagana oggolayn.

**(B) Jihada Galbeedka**

1. Waxaa xadka madaarku uu noqonayaa wadada Cad ee hawdka u baxada.

**(C) Jihada Bari**

1. Waxaa xadka kowaad yahay calaamadii hore ee labada tiir & kore-Gaadhka Ciidanka, iyada oo jihada bari ee diyaaradu ka duusho/kana soo degto ee buurta cidhifkeeda aan laga dhisi karin wax dhisme ah.

**(D) Jihada Waqooyi**

1. Wadada laamiga ah ee madaarka soo galaysa marka laga qaado '155m' oo waqooyiga badhtamaha ka xiga ayaa xayn daabka kowaad u ah xadka cusub ee madaarka.
2. Waqooyi Galbeed xerada ciidanka Gas.m ayaa Xad u ah.

**(E) Jihada Waqooyi Bari**

1. Xadka koowaad waxa uu ku joogaa '400m' kaliya.

2. Jihada waqooyi illaa singa-singaha ee madaarka Caasimada Hargeisa ee Xadka wixii ka baxsan waxaa loo

ogol yahay dhisme aan ka badnayn laba dabaq sida uu jidaynaayo xeerka caalamiga ee maamulka saadasha Hawadu(ICAO).

3. Sidaasi Darteed, mudane Madaxwayne anagaoo ixtiraam wayn kuu hayna xadkii Madaarka Caalamiga ah ee Caasimada Hargeisa ee Guddi ahaan aad noogu saartay Xadayntiisa waxa aanu ku soo xadaynay sidaasi sare ku xusan (Eeg lifaaqa sketchka Halkan ku lifaaqan).

AllAA MAHAD LEH

1. Eng. Xuseen Maxamuud Jiciir
   (Duqa Caasimada Hargeisa)…………………………..

2. Maxamed Nuur Caraale 'Duur'
   (Wasiirka Arr/Gudaha JSL)………………………..

3. Dr Xuseen Ahmed Maxamed 'Xoog'
   (Wasiirka Caafimaadka)……………………….

4. Maxamud Xaashi Cabdi
   (Wasiirka Duulista Hawada)………………………………..

5. Pro. Ismaciil Muumin Aar
   ( Wasiirka Hawlaha Guud/Guriyeynta /Gaadiidka)……….

JSL/M/XM/249-1072/052012 05/05/12

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0232/052012

# Magacaabid

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Arkay: | Qoraalka Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee MOE&HE/01/367-37/12 kuna taariikhaysan 30/04/2012; |
| Markuu Tixgeliyey: | Talada Guddida Tacliinta Sare ee JSL oo ah in la abuuro Guddida Sare ee Jaamacadda Hargeysa (Board of Trustees for University of Hargeisa); |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda Guddida Sare ee Jaamacadda Hargeysa u leedahay dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo magacaabidda Xubnaha Guddida Sare ee |

Jaamacadda Hargeysa (Board of Trustees for University of Hargeisa);

<u>Wuxuu go'aansaday</u>

In uu magacaabao Guddiga Sare ee Jaamacadda Hargeysa (Borad of Trustees for University of Hargeisa), Guddigaas oo ka kooban 9 xubnood oo sidan hoos ku xusan:

1. Dr. Sacad Cali Shire, Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta (Chairperson)
2. Dr. Xuseen Muxumed Maxamed, Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka (Vice Chairperson)
3. Zamzam Cabdi Aden, Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare
4. Maxamed Siciid Maxamed Gees, Gudoomiyaha Akaadimiyadda Horumarka iyo Nabada
5. Suldaan Axmed Daahir Muuse
6. Sacdiya Muuse Axmed
7. Kaltuun Sh. Xasan Cabdi
8. Mahdi Cismaan Buuri
9. Xasan Axmed Bulbul

Guddigu waxay xilkooda u gudan doonaan si waafaqsan Shuruucda Dalka iyo Xeerka Jaamac0adda Hargeysa.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

JSL/M/XERM/249-1081/052012 05/05/12

# XEER MADAXWEYNE

# Lr: 0240/052012

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada Gudoomiyaha Gobolka Salal;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;

Markuu ku Qancay: In uu buuxin karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Nuur Cismaan Guuleed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Salal ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XILQ/249/1-1105/052012 05/05/12

Ku: Mudane, Axmed Cumar Sangoore
Wakiilka Somaliland ee Hore ee Dalka Ingiriiska
London

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wakiilka Somaliland u fadhiya dalka Ingiriiska.

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Cali Aadan Cawaale, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JSL/M/XERM/249-1103/052012 17/05/12

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0241/052012

### Cafis Madaxweyne

# Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Arkay: | Qodobka 149aad ee Xeerka Ciqaabta Guud; |
| Markuu Dersay: | Soo jeedintii Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Garsoorka; |
| Markuu La Tashaday: | Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka; |
| Markuu Tixgeliyey: | Munaasibada Sanad guuradda 21aad ee 18ka May 2012, oo ay haboon tahay in saamaxad loo fidiyo Maxaabiista dembiyada fud-fudud ku xukuman; |

## Wuxuu Soo Saaray Xeerkan

Qodobka 1aad:

Madaxweynaha JSL wuxuu saamaxad buuxda u fidiyey Maxaabiista xukuman ee Xabsiyada dalka ku xidhan oo tiradoodu dhan tahay 633 Maxbuus, laga bilaabo maalinta uu saxeexo Xeerkan, marka laga reebo dembiyadan soo socda:

1. Dilka, isku day dil, iyo dhaawac aad u culus ee ku xusan Qodobada 434,434/17,440 (3) ee Xeerka Ciqaabta Guud (XCG).
2. Dembiyada Qaranimada ka dhanka ah ee ku xusan Qodobada 184 ilaa 239 XCG.
3. Falal Budhcadnimada ee ku xusan Qodobada 484, 485, 486 ee XCG, iyo Qodobada 205/207 ee Xeerka Badda, iyo Xeer Lr. 52/2012 ee La dagaalanka Budhcad Badeeda.
4. Maxaabiista faldembiyeedka budhcad badeeda u xidhan ee laga soo wareejiyey dalka Seychelles ee xadhigooda ku qaadanaya Xabsiyada Somaliland.
5. Dembiyada kufsiga iyo dhaqan xumada ee ku xusan Qodobada 398, 400 XCG.
6. Dembiyada mukhaadaradka ah ee Xeer Lr. 21/2002 ee 22/03/2002.
7. Dembiyada lidka ku ah Hantida Qaranka ee ku xusan Qodobada 241, 244 ee XCG iyo kuwa ku xusan Xeerka La-dagaalanka Musuq maasuqa ee Lr. 38/2007.

8. Dembiyada culus ee ku xusan Xeerka Ciqaabta Ciidamada Qalabka sida ee 434/38,170,195 (Bis), 102, 98.

Qodobka 2aad:

Maxaabiista Garsugayaasha ah iyo kuwa la xukumay samaxadan dabadeed.

Qodobka 3aad:

Samaxadani ma saameynayso xuquuqda madaniga ah ee ka dhalatay dembiga.

Qodobka 4aad:

Saamaxadani ma saameynayso raadka ciqaabeed ee uu reebayo dembigu, sida ku xusan Qodobka 92aad ee Xeerka Ciqaabta Guud.

Qodobka 5aad:

Waxaa samaxadan fulinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka, iyadoo la raacayo liiska maxaabiista ee ay soo gudbiyeen Taliska Ciidanka Asluubta ee degreetadan ku lifaaqan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# *QAYBTA SADEXAAD*:

# DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM

JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND
WASAARADDA CADAALADDA IYO
ARRIMAHA GARSOORKA
XAFIISKA WASIIRKA

RAPUBLIC OF SOMALILAND
MINISTRY OF JUSTICE AND
JUDICAL AFFAIRS
OFFICE OF THE MINISTER

Ref : WC/XW/G-2     /12                                        TAARIIKH 13/05/2012

KU: Guddomiyaha Maxkamada Sare ee Qaranka…...........… Hargaysa

Ku:Guddomiyeyaasha Maxkamadaha racfaanka dalka…... Fadhigooda

KU: Dhamaan Xafiisyada Nootaayooyinka………………..... Fadhigooda

Ku : Dhammaan Xafiisyada Ma'duunada Sharciga ………. Fadhigooda

Ku: Xafiisyada Arrimaha Dhulka & Guryaha (Real States).. Fadhigooda

Ku: Shirkadaha Sharciga (Legal Firms ) …………..…….. Fadhigooda

Ku: TV-ga Qaranka ………………………………………...... Hargeysa

Ku: Radio Hargaysa ……………………………………….. Hargaysa

OG: Wasiireka Maaliyadda …………………………….…..... Xaruntiisa

OG: Madaxwaynaha JSL ………………………………………. Xaruntiisa

<u>Ujeedo Xeer Wassir No .5 (Ministerial decree No.5 ) oo lagu dhaqan gelinaayo cashuurta ku-dhejinta Tigidhada</u>

Wasiirka Wasaaradda Caddaladu :

Markuu Arkay ; Xeerka Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somaaliland ee sumaddisu tahay JSL/M/WM/222- 1052/042012 ee ku taariikhaysan 25/04/12 ee Ujeedadiisu tahay "Hirgelinta Cashuuraha ku- dhejinta Tigidhada " kuna socotay Dhamaan Wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda;

Markuu Arkay: Xeerka wasiirka Maaliyadda ee sumaddisu tahay, WM/02/08- 01/673/12 Ee la qoray 06-05-2012 ujeedadiisuna tahay "Wakhtiga Dhaqan-gelinta Cashuurta ku-dhejinta Tigidhada "oo lagu caddeeyey in hirgelinta cashuurta Ku-dhejinta la bilaabayo 12/05/2012 oo maalintii shalay ah.

Markuu Tixgeliyey; Baahida loo qabo in laga wada qayb qaato hirgelinta cashuurta ku-dhejinta Tigidhada

Wuxuu soo saaray xeerkan Wasiir ;

1. Waxaa lagu wargelinayaa dhamman mas'uuliyiinta iyo xafiisyada uu xeerkan wasiir ku socdo.

b. in dhaqan gelinta ku dhejinta tigidhadu ay dalka si rasmiya uga bilaabantay maalintii shalay ee taariikhdu ahayd 12/05/2012 ;

t. in laga bilaabo taariikhda xeerkan wasiir aanay bixin , qabanina dokumanti lagu waajibiyey in tigidh lagu dhejiyo oo aanu ku dhejisnayn tigidhka lagu waajibiyey ;

j. in helitaanka tigidhada iyo qoraalada ay ku qeexan yihiin dokumantiga ay ku waajibayaan ku-dhejinta Tigidhadu iyo qiimaha tigidhada ku waajibaya dokumentiyada kala duwan ay kala xidhiidhaan xafiisyada cashuuraha beriga iyo xafiisyada xisaabiyeyaasha guud ee Gob/Degmooyinka .

2. waxaa lagu adkaynayaa masuuliyiinta iyo xafiisyada uu xeerkan wasiir ku socdo in laga bilaabo taariikhda dhaqan gelinta ku dhejinta tigidhada oo ah 12/05/12 uu
dokumantigii lagu waajibiyey ku dhejinta tigidhka ee aanu ku dhegsanayn tigidhkii lagu waajibiyey aanu lahayn ku dhaqan sharci (Legal Validity) .

3. waxaa si gaara loog codsanayaa Guddomiyeyaasha maxkamadaha uu xeerkan wasiir ku socdo in aanay maxkamaduhu aqoonsan dokumentiga lagu waajibiyey ku dheginta tigidhka ee aanu ku

dhejisnayn tigidhkii lagu waajibiyey laga bilaabo taariikhda Xeerkan Wasiir .

4. waxaa laga codsanayaa mauuliyiinta iyo xafiisyadn uu ku socdo xeerkan wasiir in ay iska xil saaraan hirgelinta ku dhejinta tigidhada oo qayb muhiim ah ka ah dakhli soo saarka dalka .

ALLAA MAHAD LEH

Xuseen Maxamed Caydiid
Wasiirka Wasaaradda Caddaladda & Arrimaha Garsoorka